# Waqtiga Waalidka (Booqashada) iyo Qorshayaasha waalidka

**Parenting Time (Visitation) and Parenting Plans**

## Waa maxay waxa la yiraa waqtiga waalidku?

Kolka labada waalid kala baxaan, maxkamadu inta badan waxa ay rabtaa in labada waalidba ay ku lug ku yeeshaan nolosha ilmahooda. Waqtiga waalidku waa waqti uu waalidka mid walbaa ilmaha waqti la qaato. Shaqo kuma leh arrintani cid hayshaha ilmaha loo xukumay ama nooca haysashadu ay tahay. Waqtiga waalidku waa waqti booqashada oo kale.

**Furitaanka iyo kiisaska haynta ilmaha waa kuwa dhib badan saameeyana xaquuq muhiim ah oo dhanka sharciyada ah. Waxaa fiican inaad talo dhanka sharciyada aad ka hesho qareen.**

## Sidee ayaa waqtiga waalidka loo gooyaa?

Waqtiga waalidku waxaa goyn karta Maxkamada. Xataa hadii labada waalid mid loo xukumay haynta ilmaha kaligii, waalidka kale waxaa loo xukumi karaa waqti uu ilmaha ku arko. Maxkamadu waxay kaloo dejin kartaa jadwal waqti waalid ah kolka labada waalid ay wadaagaan haynta ilmaha. Waqtiga ilmaha uu arkayo waalidku waa khasab inuu noqdo mid "maslaxo u ah" ilmaha. Si ay u gooyso waqtiga waalidka, maxkamadu waxa ay eegtaa arrimo badan sida da'da ilmaha, amaanka ilmaha, iyo ilmahu xiriirkii uu horey ula lahaa waalidka. Waxaa jira 12 tobon arrimood oo maslaxada ilmaha ku saabsan oo khasab ay tahay in Maxkamadu ay tixgeliso. Eeg warqada xogta aruurasan ee, [Aabanimada iyo Hayshada Ilmaha.]



Guud ahaan, waalidku waxaa uu helaa ugu yaraan 25% waqtiga waalidka ee ilmaha ah. Tan waxaa la xisaabiyaa iyadoo la tiranayo tirada inta habeen ee ilmahu la baryo waalidka muddo 2-asbuuc ah. Tusaale haan, 25% waxa ay la mid tahay Sabti iyo Axad dhaaf iyo hal maalin asbuucii. Haddii midkood labada waalid uusan ilmaha la baryin, maxkamadu waxa ay eegi kartaa waqti dheer oo kale oo uu ilmahu la qaadan karaa waalidkaa.

Marmarka qaarkood, maxkamadu waxa ay bixisaa"waqti waalid oo macquul ah" iyadoon si gaar ah wax u cayimin. Kolkaa waalidku waa inay iyagu sameystaan qorshe ay iyagu leeyihiin. Laakiin, hadii labada waalid midkood uu codsado, maxkamadu waxay gooysaa maalmo iyi waqtiyo cayiman oo waqti waalidka ah.

Maxkamadu waa dhici karta inay siiyo waqti siyaado oo waqtiga waalidka ah hal waalid si uu u xanaaneeyo ilmaha inta waalidka kale uu shaqada jirto. Hadi aad tan codsato, maxkamadu waxa ay eegtaa sida labada waalid u wada shaqeeyaan, sida ay wada jir uga shaqeeyaan labada waalid arrimaha booqashada iyo inay jiro dagaal qoyska dhexdiisa ah iyo in kale.

## Qorshayaasha Waalidka

Waalidku waxa ay ku heshiin karaan inay adeegsandaan isticmaalaan “Qorshe Waalid.” Waxa ay ka wada shaqeeyaan dejinta qorshe sheega waqtiga waalid walbaa uu la qaadanayo ilmaha iyo sida ay ku gaarayaan go’aanada ku saabsan ilmaha. Waa aad sameyn kartaan qorshe waalid xataa hadii aydnaan waligiin is guursan ama aydnaan wada noolaan. Waxaa jira akhbaar kale oo ku saabsan qorshayaasha waalidka oo hoos ku qoran.

## Ka waran xadadka waqtiga waalidka?

Maxkamaddu waxa ay ku xadidi kartaa waqtiga waalidka ilmahu uusan la noolayn wax ka yar 25% haddii ay u badan tahay inuu waalidkaasi uu waxyeelo u gaysto caafimaadka iyo amaanka jireed, maskaxeed ama koritaamada iyo horukaca caadifadeed ee ilmaha. Waxay siddoo kale xadidi kartaa waqtiga waalidka ee ilmaha haddii waalid uu jabiyo amarka maxkamadda ee waqtiga waalidka ee ilmaha la’aan sabab fiican.

Maxkamadu waxa ay xadidi kartaa waqtiga waalidka iyadoo:

- Aan ogolaanayn booqashooyin habeen bari ah.
- Xukunta inay khasab tahay in waalidka kale uu **kormeero**, ama rug booqasho kormeer leh la tago ama qaraabo kormeeto.

Maxkamadu sidoo kale waxay saari kartaa shuruudo waqtiga waalidka, sidda amrida waalidku in uusan muddo cayiman khamri ama maan-dooriye isticmaalin ka hor ama xilliga waqtiga waalidka ee ilmaha. Maxkamadu waxay amri kartaa daryeel khamriga ama maandooriyaha ah in la helo.



Hadii cid rabta waqti waalid hadda ka hor lagu helay dambiyada qaarkood sida:


- qaatilnimo, dil
- gacanqaad
- a-fduub
- ka xayuubinta qof kale haynta ama xaquuqda waalidka
- dhilaysi, qabanqaabinta ama qalqaalinta dhilonimo ku lug leh ilmo aad qaan gaar ahayn
- fal dambiyeed kufsi ah
- zino
- nacabnimo u ciqaabid ilmo
- dayac
- habjabaad iyo argagax
- dagaal qoyska dhexdiisa ah oo qof la ceejiyo

Waa inay cadeeyaan in waqti la qaadashada ilmahu ay tahay maslaxada ilmaha. Nidaamkani kaliya waxa uu quseeyaa dambiyada qaarkood ah iyo duruufo gaar ah., sida hadii dhibanahu dambiga laga galay uu yahay qof qoyska ka mid ah ama ehel ama dambi ku helida ay dhacay 5 tii sanno ee la soo dhaafay gudahooda. Haddii maxkamaddu ay xukunto inuu dhacay tacadi qoyska dhexdiisa ah, waxa ay u badan inay xukunto in ilmaha sharciyan uusan waalidkaasi mas’uul ka noqon.

## Waa maxay dedejiyaha waqtiga waalidku?

Maxkamadu waxaa dhici karta inay magacowdo “dedejiye” waqtiga waalid. Kan waa qof caawiya waalidka kolka ay qabaan khilaaf ku saabsan waqtiga waalidka. Dedejiyahu waxa uu dhagaystaa labada dhinac ee khilaafku u dhaxeeyo ka dibna waxa uu gaaraa go’aan.

Marmarka qaarkood maxkamadu waxa ay amartaa in go’aanku uu yahay mid wax “qabanaya” (oo ay khasab tahay in la raaco) aan ka ahayn in hal dhinac uu maxkamad tago ka dibna maxkamadu bedesho amarka. Kiisas kale, go’aanku waa mid “aan-qabanyn” cidna khasabna ma aha in la raaco aanka ahayn in xaakim amaro in la raaco.



Waxaa jira kharash ku baxda dedejiya waqtiga waalidka. Maxkamadu kuma khasbi karto qolyaha dacwadu ka dhaxaysaa inay isticmaalaan dedejiye waqti waalid hadii labada qolo labaduba ay sheegtaan inay yihiin dhibanayaal lagu tacadiyey, labada qolo midkood uusan awoodin bixinta kharashka dedejiyaha.

## Sidee ayaa waqtiga waalidka loo bedeli karaa?

Waalidku waxa ay ku heshiin karaan waqtiga waalidka. Tusaale ahaan, labadda midkii raba ayaa waydiisan kara kan kale in lagu sameeyo isbedel qorshe maalin balani qabsaday uuna gudo waqtigaa mar kale. Hadii waalidiintu aysan ku heshiin karin arintaa waalidka midkii waa ka codsan karaa maxkamadu inay wax ka bedesho waqtiga waalidka haddii taasi ay tahay maslaxada ilmaha. Maxkamadu waxay kaloo eegi kartaa wixii isbedelo ah ee soo kordhay wixii ka dambeeyey waqtigii amarkii ugu dambeeyey la soo saaray si ay u eegto in amar cusub loo baahan yahay si loo dhowro maslaxada ilmaha.

## Waalidka ilmaha hayaa ma diidi karaa waqtiga waalidka?

Inta badan, maya. Hadii ay dhibaato jirto, waalidkaasi waa khasab inuu helo in amarka waqtiga waalidka la bedelo. Waalid ma diidi karo waqtiga ilmaha hadii waalidka kale uusan bixinayn kaalmada masaariifta ilmaha. Maxkamaddu waxa ay bedeli kartaa amarka waqtiga waalidka ee ilmaha haddii ay jirto khatar uu ku sugan yahay waalidka ilmaha hayaa ama ilmahu ama hadii waalidka kale uu si joogta ah u jabiyo heshiiska waqtiga waalidka. Ka hor inta aadan maxkamad tagin, ma diidi kartid waqtiga waalidka aan ka ahayn in adiga ama ilmahu uu khatar **halis** ah ku jiro.

Hadii waalidka ilmaha hayaa uu diido waqtiga waalidka sabab fiican la’aan kolkaa maxkamadu:

- waxa u ogolaan kartaa in waalidka kale loo gudo waqtiga waalidka ee gafay.
- in iyada/isaga lagu helo maxkamad yasid taa oo leh ganaax gaari kara ilaa iyo $500.
- kiisaska aadka u culus, waxay u isticmaali kartaa diidmada aan xaqqa ahayn ee waqtiga waalidku inay noqoto sabab wax looga bedelo haynta ilmaha.

**Marnaba ma xumaan karto diidida waqtiga waalidka si looga ilaaliyo ilmo khatar halis ah.**
Hadii ilmahaagu ay khatar halis ah gelinayso waqtiga waalid kale, waxa aad maxkamad hor keeni kartaa codsi degdeg ah. Codsiga degdega ah waxaa la yiraa codsiga (Ex Parte) waxayna maxkamadu ugu eegtaa si ka degdegsan sida codsiyada caadiga ah. Laakiin maxkamadu kaliya waxa ay ansaxin kartaa codsiga (Ex Parte) marka ay jirto xaalad run ah oo degdeg ah.

## Oofinta Waqtiga waalidka

Oofinta amarka waqtiga waalidku waa uu adkaan karaa, gaar ahaan hadii ilmahu uu roon yahay uusana doonayn inuu booqdo waalidka kale. laakiin amarka maxkamadeed ee waqtiga waalidka waa la oofin karaa inta ilmahu uu ka gaarayo 18.

Hadii mid ka mid ah labada waalid uu u malaynayo in tani ay dhici karta mar kale mustaqbalka, waa inay waydiistaan maxkamada inay ku qorto war qorshaha waalidka oronaya hay’adaha sharci ilaalintu waxay “awood buuxda” u leeyihiin fulinta amarka hadii amarka aan loo hogaansamin. Hadii jaa ay waalidku haystaan amar, uuna dhex yaal dhibi, waxa ay dooran karaan inay ka codsadaan in maxkamadu caawiso.

Hadii ay jiraan daliilo ah in waalidka aan ilmaha hayni uusan u hayn deegaan quman oo amaan ah ilmaha, kolkaa ilmaha waalidka hayaa waxa uu ka codsan karaa maxkamadu inay bedesho amarka.

## Waalidka ilmaha kaligii inuu haysto loo xumukay ma ka guuran gobolka?

Haddii hal waalid kaligii loo xukumo haysiga ilmaha uuna doonayo inuu ilmaha kala guuro gobolka, waa inuu ka helaa ogolaansho waalidka leh waqtiga booqashada waalidka. Tani marmarka qaarkood run weeye siddoo kale marka ilmaha loola guurayo gobolka dhexdiisa. Ogolaanshahu waa inuu qornaadaa, hadii aad iska baxdo ogolaansho la’aan waa dambi taasi waxa aadna dhumin kartaa haysashada ilmaha. Hadii waalidka kale uusan ogolaan guurida, waalidku waa inay maxkamad tagaan.

Waalidka kaligii loo xukumo haysiga ilmahu waa inuu tusaa maxkamadda in guuriddu ay tahay maslaxadda ilmaha. Maxkamadu waxa ay eegtaa dhowr waxyaabood, sida heshiisyada waqtiga waalidka, baahida caadifadeed ee ilmaha iyo in guurida ay tahay qorshe looga dheereeynayo arkida waalidka kale ee ilmaha. Kolkaa maxkamadu waxa ay go’aansataa inay u ogolaato in ilmaha iyo waalidku guuraan iyo in kale.



Haddii waalidka kale uusan lahayn waqti maxkamaddu u goysay oo uu ilmaha ku arki karo, waalidka ilmaha hayaa markii uu rabo ayuu guuri karaa.

## Awoowe iyo ayeeyadu ma raadin karaan booqasho?

Haa, hadii ay ka soo baxaan shuruudo cayiman. Waa ay dhib badnaan kartaa. Eeg warqada xogta aruurasan ee, *Booqashada Awoowaha iyo Ayeeyada*.

## Macluumaad Dheeraad ah

Waa ku jira waxa aad ku isticmaalij kartaa: www.mncourts.gov:



→ Riix "Help Topics" *(Mawduucyada Caawinta)*
→ Riix "Child Custody & Parenting Time" *(Waqtiga Waalidka & Haynta Ilmaha)*

# Wax kale oo ah Qorshayaasha Waalidka

## Ma khasabaa inaan lahaado qorshe waalid?

Maya. Adiga iyo waalidka kale ayaa go'aansada hadii aad doonaysaan inaad sameystaan qorshe waalid. Khasab idin kuma aha, marmarka qaarkoodna ra'yi wacan ma aha. Marmarka qaarkood maxkamadu iyada ayaa mid idiin sameynaysa, laakiin, maya hadii labada waalid midkood uu u geystay tacadi midka kale.

Xasuusnow, waa aad sameysan kartaa qorshe waalid xataa hadii aydnaan waligiin is guursan ama wada noolaan labadiinu.



## Maxay tahay inay ku jiraan qorshaha waalidka?

Qorshahu waa inuu lahaado

- Jadwal ah waqtiga uu waalid walbaa la qaadanayo ilmaha
- Cidi gaaraysa go'aanada qaarkood ee ku saabsan ilmaha
  **IYO**
- Qaab lagu xaliyo muranada

## Waa maxay waxyaabo kale oo ku jiri kara qorshaha waalidka?


Qorshahu waxa uu adeegsan karaa kalmado aan ka ahayn "jireed" iyo "haysashada sharciyeysan." Laakiin, waa khasab iyana inuu si cad u sheego hadii waalidku ay leeyihiin haysasho sharci ah oo wadajir ah ama hayasho la noolaan ah ama labada waalid kan kaligii leh xaquuqda haysashada sharciga ah ama haynta la noolaanshaha leh oo kaliga u ah.

Waa aad u sheegi kartaa maxkamada sida aad jeclaan lahayd inay u gaarto go'aanka ku saabsan kala guurida ilmaha Minnesota. Tusaale ahaan, waxa aad u sheegi kartaa maxkamada inay adeegsato arimha "maslaxada ugu roon ee ilmaha"si ay go'aan u gaarto. Laakiin uun hadii:

- Labada waalidba ay qareen leeyihiiin kolka ay maxkamadu ansixinayso Qorshaha **AMA**
- Amarka maxkamadu yiraa labada waalidba si buuxda ayaa loola socodsiiyaa Qorshahuna waa ikhtiyaar, waalidkuna waa ay fahamsan yihiin.

Qorshahu waa uu sharxi karaa kharashka waalid walbaa uu bixinayo ee ilmaha laakiin waa inuu waafaqsanaadaa habraaca kaalmada masaariifta ilmaha ee Minnesota.

Waa aad faahfaahin kartaa Qorshahaaga hadii aad rabto. Tusaale ahaan, waxa aad sameyn kartaa qorshayaal iyo hadafyo khaas ah oo ku saabsan wada xiriirka. Qorshahaagu waxa uu sharxi karaa inta goor ee telefan ama emayl lagula xariirayo ilmaha ama ka qaybgalka ilmaha ee hawlaha sida ciyaaraha ama muusikada. Qorshaha waalidku inta badan waxa uu yeelan karaa faahfaahino ka badan kuwa jadwalka waqtiga ilmaha.



Tusmo ah Qorshaha Waalidka ayaa laga heli karaa khadka (online) ka ee halkan http://www.mncourts.gov/documents/Parenting-Agreement-Worksheet.pdf

## Ka waran hadii ay jireen tacadiyo qoyska horey uga dhex dhacay?

Hadii hal waalid ahi uu u geystay tacadi waalidka kale ama ilmaha

- Maxkamadu idiinma sameyn karto Qorshe Waalid adinka
- Maxkamadu ma amri karto Qorshe Waalid si uu u bixiyo Haynta Sharciyeysan ee wadajirka ah

  **IYO**
- Jidka Qorshaha Waalidka ee xalinta muranada waxa kaliya oo ansaxin kara maxkamada

## Ka wadan hadii aan doonayo inaan wax ka bedelo qorshaha waalidka ha dhow?

Waa aad bedeli kartaa Qorshaha Waalidka hadii adiga iyo waalidka kale aad isku raacdaan. Hase yeeshee, si loo meel mariyo isbedelka, waa khasab inaad haysato amar maxkamadeed. Marmar waa khasab in la soo maro dhexdhexaadin ka hor inta aan waxba laga xareyn maxkamad si loo bedelo qorshaha. Eeg Qorshahaaga Waalid si aad u argato inuu leeyahay waa khasab inaad dhexdhexaadin soo martaan ka hor inta aadan sameyn wax dacwo maxkamad ka xareysi ah.



**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**